# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 23aad

**23 September 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga:-** Warbixinta Xisaab Xidhkii Sannadka 2024kii ee Hantidhawrha Guud ee Qaranka

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal, , ajandaha maanta waxaynu u balansanayn, xisaab xidhkii 2024kii oo hanridhawraha Guud ka warbixinayo, marka waxaan ku soo dhawrnaynaa hantidhawraha, Mudane hantidhawre guud ku soo dhawow.

**Md. Muuse Yuusuf Cismaan (Idigaa) Hanti dhawraha Guud ee Qaranka**: - Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiyaha Gollaha wakiilada, xubanaha xildhibaanada fadhiya "inanta xildhibaanada ah, xoghaynta, saraakiisha ka socota Hanti dhawrka guud, shaqaalaha Gollaha wakiilada iyo lataliyaasha, Saxaafada Asalaamu Calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

Mudanayaal waxa aanu manta idiinku Nimi in aan idinla wadaagno xisaab- xidhkii 2024, oo hada laydin qaybiyay, xisaab xidhkani waa xisaab-xidh aan muddo 8 casho ah aan ka soo gaadhay, xilka waxaan la wadaagay 22 june idinkana waxaan idiin soo gudbiyay 30 kii june dedaal fara-badan awgeed waxaa noo suurta gashay in aanu waqtigii Dastuuriga ahaa ku soo gudbino xisaab xidhka.

Xisaab- xidhkaa waxaanu usoo gudbinay Guddiga dabagalka iyo Hantida Qaranka oo koley eegtay idinkuna waxaad jaanis u hesheen in uu gacan tiina soo galo oo aan filayo in aad ka bogan doontaan oo aan filayo in aad si fiican u akhriyi doontaan.

Shaqada iyo Nuxurka uu xanbaarsan yahay xisaab-xidhku runtii waa mid iga horaysay laakiin alle mahadii mar haday noo suurta gashay in aan soo uruurino oo isaga oo Buug ahna daabacno, oo inta badan daabacaada lafteedu ay noqoto cilad iyo carqalad jiitanto oo ay waqti badan qaadato alle mahadii wey noo suurta gashay.

Nuxurka uu Buugu uu koobsanayo oo ah farsamo ahaan xisaabtii inooga soo wareegtay Xisaabiyaha guud oo aanu anaguna warbixin saarnay waxaan jecelahay saraakiishayda mid ka mid ah in uu inala wadaago xogta Buuga.

**Agaasime: mustafe yuusuf kaamil: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiyaha Gollaha wakiilada, xoghayaha Gollaha wakiilada, Hanti- dhawraha guud ee Qaranka saraakiisha kale ee Gollaha wakiilada, saraakiisha xafiiska Hanti dhawraha guud ee Qaranka, Saxaafada JSL waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

Hanti dhawraha guud waxa uu halkan idinku soo gudbiyay warbixintii la idiinku talagay sanad maaliyadeedka 2024ka Buuga laydiin dhiibay waxa uu ka kooban yahay 8 qaybood hadaan in yar ka horaysiiyo miisaaniyadii 2024ku Gollaha wakiiladu waxa ay dib u Ansixiyeen in lagu dhaqmo miisaaniyadii 2023ka markaa miisaaniyadaa waxaa ku gadaanaa Duruufo badan, Doorashooyin, Dagaalo iyo hawlo badan oo Dalka ka jiray.

Markaa waa miisaaniyadii 2024ka warbixinta halkan la idinku soo gudbiyay sidaan sheegay waxay ka kooban tahay 8 qaybood, marka ugu horaysa Aragtida Hanti-dhawraha guud eek u saabsan warbixintii maaliyadeed ee sanadka 2024ka ee uu soo Gudbiyay xisaabiyaha guud ee Qaranku, Aragtida Hanti-dhawraha guud uu ka bixiyay ayaa ugu horaysa, waxaana uu ka bixiyay Aragti Taban.

Sababihii uu kaga bixiyay waxay ku qoran tahay Boga warbixinta Hanti-dhawraha guud oo aad kala soconaysan, si guud xisaab-xidhka naloo soo gudbiyay waxa uu uqaybsamaan Seddex qaybood.

1. Xisaab-xidhka Dawlada Dhexe
2. Xisaab-xidhka Dawladaha Hoose
3. Xisaab-xidhka Hay`adaha Macaashka sameeya.

Markaa warbixinta laftarkeedu waxay ku saabsan tahay Seddexdaa qaybood ee ah warbixinta Xisaabiyaha Guud uu soo gudbiyay ayay ku salaysan tahay.

Guud ahaan Hanti dhawraha guud iyada oo waxaas oo Duruufo jireen waxa la sameeyay Baadhisyo, waxa la` idinku soo gudbiyay baadhisyadaa Buuga guud ahaan iyaga oo faah-faahsan waxa uu buugu u qaybsan yahay Natiijada baadhista kasoo baxdey, saamaynta ay leedahay Natiijadaasi, iyo Tallo wixii hanti dhawraha guud uu ku talo bixinayo , wasaarada maaliyada iyo wasaaradaha kale ayaa ku jira.

Warbixinta waxaa ka mid ah mashaariicada uu inaga caawiyo Baanka aduunku, oo iyaguna qaybta7aad ku qoran kuna faah-faahsan, guud ahaan 8 mashruuc ayaa uu world Banku xisaab maaliyadeedka 2024ka oo kolay faah-faahintooda aad akhriyi doontaan oo aad eegi doontaan, intaa ka dib waxa ku lifaaqan xisaab-xidhkii uu soo gudbiyay xisaabiyaha guud oo aragtida laga bixinayo oo qaybta ugu danbaysa ee 8aad ah waxaan soo jeedinaynaa in ad akhridaan wixii suaalo ee aad naga weydiinaysaan diyaar baanu unahay intaas ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------- | -------------------------------------- |